Amaahda Guryaha ee Servus Halal

Yeelo guri kuu gaar ah adigoo adeegsanaya

Servus Halal

Servus Halal, oo la bilaabay 2025, waxay bixisaa adeegyo maaliyadeed oo kale, oo ay ku jiraan amaah guri kaas oo xalaal ah. Iyadoo ah shirkad hoos timaadda Servus Credit Union Ltd., dhammaan adeegyadayada waxaa shahaado ka siiyay Ganadian Islamic Finance Board (Guddiga Maaliyadda Islaamiga ee Kanada).

Waa maxay Amaahda Guryaha ee Halal?

Amaahda Guryaha ee halal waa nidaam maaliyadeed oo beddel u ah amaahda guryaha ee caadiga ah ee ay la socoto ribada. Halkii ribo laga qaadi lahaa, nidaamkan wuxuu ku shaqeeyaa qiimaha asalka ah ee guriga iyo faa'iidada la isku raacay ee hore loogu heshiiyay. Amaahda Guryaha ee halal waxaa loo sameeyaa si ay ula jaanqaado mabaadi'da maaliyadda Islaamka.

Sidee ayuu u shaqeeyaa Amaahda Guryaha ee Servus Halal?

Servus Halal waxay ka iibsataa guriga iibiyaha, kadibna waxay adiga kaaga sii iibisaa qiime la isku raacay oo faa'iido ku jirto. Qiimaha gurigu wuxuu ku jiraa qiimaha asalka ah ee guriga iyo faa'iido la isku raacay oo Servus Halal loo oggolaaday. Qorshaha dib-u-bixinta ee 25-ka sano ah wuxuu kuu oggolaanayaa lacag-bixinno la saadaalin karo, isla markaana si buuxda kuu tusaya wadarta kharashka amaahda gurigaaga.

ASTAAMAHA	SHARAXAADA
Helitaanka	Waxaa heli kara dhammaan dadka danaynaya inay guri ka iibsadaan Alberta. OGEYSIIS: Macmiisha Servus Halal looma baahna inay xubin ka noqdaan Servus Credit Union Ltd. Badeecadaha ay iibiso Servus Halal uma qalmaan Wadaagga Faa'iidada.
Muddada Deynta Guriga iyo Muddada Lacag-bixinta	25 sano
Lacag Bixinta Horumariska ah	Ugu yaraan 20% qiimaha guriga ayaa loo baahan yahay.
Noocyada Guryaha La Ogolyahay	Alaabtan waxaa lagu dabaqaa guryaha hore loo isticmaalay. (Guryaha cusub ama kuwa ku dhow dhammaystir ma ku jiraan).
Heerka Faa'iidada	Faa'iidada waxaa lagu xisaabiyaa heer faa'iido oo go'an oo ku saleysan muddada amaahda.
Caymiska	Caymiska guriga waa loo baahan yahay.

[1] Guddiga Maaliyadda Islaamiga ee Kanada (Canadian Islamic Finance Board – CIFB) waa hay'ad aan faa'iido doon ahayn, oo ay ku matalayaan masaajiddo badan oo ku yaalla guud ahaan Kanada

servus halal

Habka Codsiga (RAAC TALLAABAHA HOOS KU QORAN SI XIRIIR AH)

1. Bilow

Booqo barta ServusHalal.ca si aad u eegto Liiska Hubinta Ogolaanshaha Hore iyo Hagaha Tallaabo-tallaabada ah. Hagayaashani waxay kuu fududeynayaan inaad si wanaagsan isu diyaariso oo aad si fudud u fahanto habka oo dhan.

2. Nala soo xiriir

Marka aad dhammayso dhammaan hawlaha oo aad soo ururiso dukumentiyada ku qoran Liiska Hubinta Ogolaanshaha Hore, noogu soo dir iimaylka info@servushalal.ca si aad ula xiriirto la-taliye maaliyadeed oo u shaqeeya Servus Halal, kaas oo kuu qaban doona ballan kulanka ogolaanshaha hore.

3. Kulanka Ogolaanshaha Hore

Xilliga kulankaaga, waxaan dib u eegi doonaa dakhligaaga, taariikhda amaahda, iyo lacagta hormariska ee aad bixisay. Haddii lagu oggolaado, waxaad heli doontaa ogolaansho hore oo amaahdaa guriga ah.

SHURUUDAHA:

- Ugu yaraan 20% lacagta horumariska ee guriga ayaa loo baahan yahay(tusaale, $100,000 marka guriga qiimihiisu yahay $500,000).
- Lacagta horumariska ah waa in lagu hayaa hay'ad maaliyadeed oo Kanada ah muddo 90 maalmood ama ka badan ka hor codsiga.
- Lacag hadiyad ahaan loo bixiyay waa la aqbali karaa, laakiin waxay u baahan tahay dukumentiyo dheeraad ah.

4. Dukumentiyada Kulanka Ogolaanshaha Hore

Dhammaan codsadeyaasha waa inay ka soo qayb galaan oo ay la yimaadaan:

- Laba aqoonsi oo sax ah oo ay bixisay dowladda (tusaale: shatiga darawalnimada, baasaboorka Kanada, kaarka deganaanshaha joogtada ah).
- Cinwaanka hadda (iyo cinwaankii hore haddii aad joogtay cinwaanka hadda wax ka yar 3 sano).
- Faahfaahinta shaqada hadda (tusaale: cinwaanka iyo lambarka telefoonka ee shirkada).
- Faahfaahinta shaqooyinkii hore (haddii shaqada hadda ay ka yar tahay 2 sano).
- Ilaha dakhliga ee la xaqiijin karo (tusaale: warqadda mushaharka, warqadda shaqo bixiyaha, bayaanka bangiga ee muujinaya mushahar si toos ah u soo gala, ama bayaanka maalgelinta).
- Haddii aad iskaa u shaqeysato la imaw: Ogeysiiska Qiimeynta iyo T1 General ee 2-dii sano ee canshuur celinta ugu dambeysay.
- Lambarka Caymiska Bulshada ee dhammaan codsadeyaasha.
- Caddeynta lacagta horumariska ah oo leh taariikh 90 maalmood ah (tusaale: bayaannada bangiga/maalgelinta, ama lacag hadiyad ah oo la bixiyay).

OGEYSIIS: Dukumentiyo dheeraad ah ayaa laga yaabaa in loo baahdo, iyadoo ku xiran xaaladdaada.

5. Dooro gurigaaga

- La shaqee wakiil guri ama si madaxbannaan u raadi guri kugu habboon.
- Marka aad guri doorato, isla markiiba u sheeg La-taliyahaaga Maaliyadeed ee Servus Halal si loo hubiyo in gurigaas uu u qalmo maalgelinta Amaahda Guryaha ee Servus Halal.
- Kadib waxaanu bilaabi doonnaa diyaarinta tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah maalgelinta.

6. Servus Halal waxay gudbisaa dalab iibsi

Servus Halal waxay kaa caawineysaa inaad iibsato hantida, ka dibna waxay kuugu iibineysaa qiimo la isku raacay oo ay ku jirto faa'iido.

7. Oggolaanshaha dalabka iyo ballanqaadka

- Ka dib marka iibiyuhu aqbalo dalabka shuruudaysan, waxaad xaqiijinaysaa go'aankaaga ku saabsan heshiiska:
- Saxiix warqad heshiis ah oo aad ku ogolaaneyso inaad sii wadato maalgelinta guryaha ee Servus Halal ee Islaamiga ah.
- Bixi lacagta horumariska ah ee iibsiga (taas oo u dhiganta ugu yaraan 20% lacagta horumariska ah ee guriga), taasoo lagu hayn doono kayd ammaan ah oo qareenno hayaan.

8. Nidaamka xaqiijinta

- Hubinta qiimaha hantida: Qiimayn xirfadeed oo xaqiijinaysa qiimaha suuqa cadaaladda ah ee hantida.
- Kormeerka guriga: Baaritaan xirfadeed oo hantiyeed oo xaqiijinaya in gurigu ku habboon yahay maalgelinta oo aan wax cillad ah lahayn.

OGEYSIIS: Qiimaynta iyo kormeerku waxay ilaalinayaan maalgashigaaga waxayna hubinayaan u-qalmitaanka maalgelinta. Haddii hantidu ay buuxiso dhammaan shuruudaha, waxaad na faraysaa inaan sii wadno howsha.

9. Dhameystirka iibsiga iyo wareejinta lahaanshaha

- Servus Halal ayaa la wareegta guriga.
- Adiga waxaad dhameystiraysaa dukumentiyada ugu dambeeya, kadibna gurigu si rasmi ah ayuu kaaga u noqonayaa.

10. Hambalyo mulkiilaha guriga!

- Lacag-bixinta billaha ah waxay bilaabanaysaa hal bil gudahood marka aad la wareegto guriga.
- Marka la isticmaalayo heshiiska maalgelinta Islaamka, lacagaha la bixinayo waxay sii ahaanayaan kuwo go'an muddada 25-ka sano ah.

Ma u qalantaa?

Eeg Liiska Hubinta ee Ansixinta ServusHalal.ca

© Xuquuqda daabacaadda 2025-2026